



Soo koobista Qorshaha Dhaqdhaqaaqa ee Bartamaha Magaalada

Aynu badalno Bartamaha Magaalada inagoo wada jirna.

Faafida ayaa beddelay sidaynu u noolnahay iyo sida aan u shaqeyno, taasoo na siisay fursad aan ku qiyaasno Bartamaha Magaalada ee cusub. Waa aynu wana shaqeynkarnaa-Sidii aan nahay Seattle Mid ah-si aanu u dhiso mustaqbal cusub bartamaha Magaalada. Waxaan abuuri karnaa Bartamaha Magaalada oo ammaan ah, soo dhaweyn leh, iyo goob bulsho ku kulanto oo gaar ah. Bartamaha magaalada oo la heli karo oo ay awoodi karo qoysaska leh carruurta yaryar. Bartamaha magaalada oo deegaan ahaan u wanaagsan, cagaaran, oo qurux badan. Bartamaha magaalada waa halka ganacsiyo yaryar oo kala duwan ay ku hormaraan kuna koraan.

Bartamaha magaaladu waxaa ka buuxa nolol iyo midab. Bartamaha magaalada oo ah ADIGA ah.

Duqa Magaalada Bruce Harrel ayaa siidaayey Qorshaha Magaalada ee la soo jeediyay ee lagu soo noolaynayo Bartamaha Seattle oo loo yaqaan Qorshaha Dhaqdhaqaaqa ee Bartamaha. Wuxuu qorshaynayaa inuu dejiyo yoolal iyo ficilo geesinimo leh si'uu u dejiyo oo uu u bedelo Bartamaha Magaalada meel ay deganayaasha, shaqaalaha, iyo booqdayaashu rabaan inay waqti ku qaataan (ku tamasheeyaan). Qorshuhu wuxuu ku dadaalayaa inuu ku dhabeeyo (xaqiiyiyo) sinjiga iyo qiyamka ee caddaaladda bulshada Seattle. Waxa kale oo ku jira natiijooyin la cabbiri karo, waqtiyo cad, iyo isla xisaabtan.

Magaaladu waxay ka shaqayn doontaa todobada yool iyo xeeladaha soo socda:

1. Ka dhig Bartamaha **amaan** iyo mid soo dhaweyn leh.
2. U beddelo Bartamaha magaalada mid firfircoon **xaafad** halkan dad badan ayaa awoodi kara inay ku noolaadaan.
3. Ka dhig Bartamaha Magaalada mid cajiib ah oo leh **tafaariiq** khibradeed.
4. Ka dhig bartamaha magaalada meel ay dadku rabaanka **shaqeeya** antaasina waxay ka tarjumaysaa mustaqbalka dhaqaalaheena.
5. Dabaaldega Bartamaha Magaalada Seattle **fanka, dhaqanka, ciyaaraha, iyo madadaalada**.
6. Ka dhig Bartamaha Magaalada **meesha ugu sareysa ee loo socdaalo** ama Seattleites iyo booqdayaasha sanadka oo dhan
7. Abuur Bartame Magaalo oo caafimaad leh, adkaysi leh, oo **cagaaran**.

Qorshuhu wuxuu qeexayaa waxqabadyo saddex waqti oo kala duwan:

- **Tallaabooyinka Geesinimada leh Hadda** – Waxqabadyo isla markiiba bilaabanaya.
- **Waxqabadyada mustaqbalka dhow** – Dadaalka dhici doona saddexda sano ee soo socota.

Downtown

is → **you**

- **Space NeedleKa Fikiriya** – Fikradaha aragtida mustaqbalka ee Bartamaha.

Qorshaha Dhaqdhaqaaqa ee Bartamaha ayaa kuu tilmaamaya mustaqbalka magaalada hoose.
Bartamaha magaaladu waa Adiga.

Sidee u aragtaa qorshahan iyo fikradaha hiigsiga? Waxaanu doonaynaa inaan maqalno [adiga!](#)

Fadlan la wadaag ra'yigaaga adigoo isticmaalaya kan [Foomka Jawaab celinta Qorshaha Dhaqdhaqaaqa ee Bartamaha Magaalada.](#)

Foomka waxaa loo turjumay luqado badan. Shaqaale laba-luqadle ah ayaa diyaar u ah inay ku siiyaan taageerada tarjumaada qorshaha waxayna kaa caawinayaan inaad soo gudbiso foomka jawaab celinta. **Haddii aad u baahan tahay caawimaad luqadda, fadlan wac (206) 684-8090.**

Jawaabtaadu waxay naga caawin doontaa inaan sii wadno xoojinta iyo nadiifinta Qorshaha Hawlgelinta ee Magaalada hoose.

Magaalada Seattle waxay ku dhiirigelinaysaa qof walba inuu ka qaybqaato barnaamijyadeeda iyo waxqabadyadeeda. Ama su'aalo dheeraad ah, tarjumaad ama tarjumaad, caawimo farsamo, hoyga naafada, agabka qaabab kale, ama macluumaadka helitaanka, fadlan kala xiriir Xafiiska Horumarinta Dhaqaalaha (206) 684-8090 ama ped@seattle.gov.